

Wargelinta Foomka Ka Doodida Ciqaabka Madaniga ah

MUHIIM: Waa inaad keentaa waraaqaha loo baahan yahay ama doodaada waa la diido doonaa. Marka aad gudbiso waraaqaha loo baahan yahay waanu kasii ambo qaadi karnaa doodaada oo waxa aanu ku siin karnaa jawaab.

Waa inaad ku lifaaqdaa **dhamaan** waraaqaha aad doonayso ee qayb ka ah doodaada. Waxa aad ku bixin kartaa macluumaad dheeraad ah bogaga gaar ah oo waxaa kamid ah wixii waraaqaha cadaynta ah ee ku saabsan.

Waxa aad ka doodaysaa kharashka jiidida gaadhiga, khidmada, ama ganaaxa maadaama oo:

[] **Gaadhiga la iibiyay/la wareejiyay kahor wakhtiga aan la jiidin.** Waa inaad keentaa warbixinta iibka

WA DOL ama xafiiska gobolka ee DMV.

[] **Lambarka gaadhiga ku jira sawirku maaha lambarkayga gaadhi.** Waa inaad sheegtaa lambarkaaga gaadhiga ee saxda ah.

[] **Gaadhi la xaday.** Waa inaad keentaa warbixinta bilayska.

[] **Dhimashada mulkiilaha ku qoran gaadhiga.** Waa inaad keentaa shahaadada dhimashada. Hadii aanad haynin macluumaadka, marka laga tago shahaadada dhimashada waxa aanu u baahanay nuqulka waraaqaha aad ku sheegeyso ama maamul. Sirta darteed, fadlan waxa aad ka saartaa taariikhda dhalashada iyo lambarka sooshaal sekuuritiga.

Waxa aan ka doodayaa **KALIYA** kharashka iyo ganaaxa (waxa aan ogahay in aan ka masuul yihiin bixin kharashka gaadhiga lagu jiiday) maadaama oo:

[] **Imay soo gaadhin kharashka la igu soo dalacay ee jiidad gaadhigu.** Kharashka jiidida gaadhi ee la igusoo dalacay waxaa lagu hagaajiyay mulkiilaha gaadhiga ku qoran ee faylka ugu jira Waaxda Liisamada. Fadlan u xaqiijin cinwaankaaga DOL oo cusboonaysii oo geli hadii loo baahdo dol.wa.gov/vehicleregistration/.

[] **Waxa aan leeyahay xisaabta *Good To Go!*** . Waxa aad u heshey wargelintan maadaama oo ay mushkilad lagala kulmay xisaabtaada.

Waa inaad la hadasho adeega macmiilka si aad u xaliso mushkiladan.

[] Xaaladaha kale ee lagu yarayn karo waxaa kamid ah:

- **Jiifid isbitaal.** Waa inaad keento waraaqaha aad kaga baxday isbitaal. Fadlan ka saar wixii macluumaad ah ee HIPAA.
- **Ciidan jiida hore loo diray** Waa inaad noo keento amarada ciidanka ama warqada ka socota sarkaalkaaga.
- **Ka saarid guri.** Waa inaad noo keento wargelinta ka saarida guriga.
- **Isku furid.** Waa inaad noo keento warqada is furitaanka ama heshiis kala taga sharciga ah.
- **Dhimasho cid qoyskaaga kamid ah.** Waa inaad keento shahaadada dhimashada.
- Khadla xisaabta ***Good To Go!*** ee intii ka danbaysay la saxay, ama khaladka waaxdu samaysay.





Fadlan waxa aad ka eegtaa boga xiga wixii tilmaamo ah ee sida aad u gudbin karto ah doodaada.

Si aad ugu gudbiso doodan boosta ama faakis, fadlan waxa aad sheegtaa macluumaadka hoose.

Magaca	
Cinwaanka Boosta	
Cinwaanka limeelka	
Lambarka Taleefanka	
Lambarka & Gobolka Lambarka Gaadhiga	
Aqoonsiga Safarka	
Tirada Wargelinta	
<i>Good To Go!</i> Lambarka Aqoonsiga Macmiilka (hadii ay ku munaasab tahay)	

BUUXI OO SOO CELI FOOMKA KA DOODIDA

Si aad dib ugu dhigto wixii daaqada dib u cusboonaysiinta gaadhiigaaga ah iyo/ama talaabada qaadida, waxa aad ku xaraysaa doodaada onleyn, nala soo hadal ama waxa aad kusoo celisaa foomkaaga dooda boosta, oo ay la socdaan cadaynta saxda ah, kahor taariikhda ku qoran boga Wargelinta Ciqaabka Madaniga ah.

 Dooda Onleynka ah: MyGoodToGo.com Waxa aad u baahan doontaa wargelintaada iyo lambarkaaga liisaanka gaadhiga.	 La hadal: 1-866-936-8246  Faakis: 1-425-399-8993	 Boosta: WSDOT Toll Enforcement Office P.O. Box 34562 Seattle, WA 98124-1562
--	--	--

CODSO DHAGAYSI

Haddii ku khilaaftaankaaga la diido, waxaad helaysaa fursad aad ku codsato dhagaysia garsooraha maamulka sharciga. Waxaad ku codsan kartaa dhagaysi adoo wacayo adeega macmiilka.

Sharciga VI ee Ogeysiiska Dadwaynaha Siyaasada Waaxda Gaadiidka Gobalka Washington (Washington State Department of Transportation's, WSDOT) ayaa dhigaysa inaan qofna, ayadoo la eegaayo qowmiyadiisa, midabkiisa, dalka uu kasoo jeedo, ama jinsiga uu yahay, sida ku xusan Sharciga VI ee Xaquuqaha Dadwaynaha ee soo baxay 1964, inaan laga reebin ka qayb galka, loona diidin gunnooyinka, ama inaan lagula kicin wax takoor ah oo ka dhan ah barnaamijka iyo hawlaha federaalka maalgeliyo. Qof kasta oo aaminsan in xaquuqiisa Sharciga VI lagu tuntay, wuxuu cabasho usoo gudbin karaa Xafiiska Fursadaha Sinnaanta (Office of Equal Opportunity, OEO) ee WSDOT. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka loo gudbiyo cabashada Sharciga VI iyo/ama macluumaadka ku saabsan waajibaadyada takoor la'aanta, fadlan kala xiriiir Iskuduwaha Sharciga VI ee OEO adoo kala xariiraya (360) 705-7082.

Xogta Xeerka Dadka Naafada ah ee Mareykanka (Americans with Disabilities Act, ADA) Xogtaan oo qaab kale u qoran ayaa la heli karaa kadib marka iimayl loo diro kooxda Kaladuwanaanshaha/Arrimah ADA ayadoo lagala xariiraayo wsdotada@wsdot.wa.gov ama laga wacaayo lambarka bilaashka ah ee 855-362-4ADA (4232). Shaqsiyaadka dhagoolayaasha ah ama maqalku ku adag yahay waxay sameyn karaan codsi ayagoo wacaaya Washington State Relay oo ah 711.